COVID-19 Vaccination Programme

10.12.2020

Qaali kooxaha bulshada,

Waad ku mahadsan tihiin dhammaan shaqadiina aad ku caawinaysaan farriimaha bulshada ee ku saabsan cudurka Covid-19 iyo xiriirka daruuriga ah ee aad u tihiin waxa ay bulshooyinkeenu dhammaantood u baahan yihiin si ay u nabad qabaan.

Qoraallada soo socda ayaa loogu talagalay in ay idiin guud maraan ama idiin soo koobaan shaqada la xiriirta tallaalka cudurka Covid iyo waxa ay uga dhigan tahay dadka Manchester.

Waxaa weliba ku jira jawaabo ka socda David Regan, Agaasimahayaga Caafimaadka Dadweynaha (Director of Public Health), oo ka jawaabaya qaar ka mid ah su'aalaha ama walaacyada aan ku maqalnay Manchester. Jawaabahan waxaa loo qoray tilmaamo aad u isticmaashaan marka aad wadahadallo la yeelanaysaan dadka aad kula kulantaan leyliyada xaafadaha.

Waxaa weliba muhiim ah in aad xasuusataan in tallaalku uu qayb ka yahay qorshe 3 laamood ah oo lagu caawiyo is hortaagga faafista cudurka -waxaana ka mid ah baaritaanka iyo weliba xeerasha daruuriga ah ee cudurka Covid ee ku saabsan nadaafadda, kala fogaynta dadka iyo waji shareerrada.

Aasaaska:

Maalintii Talaaddadii 8 Diisembar, adeegga NHS ayaa bilaabay in uu bukaannada ka tallaallo koronfayrus oo uu ku tallaalo 50 xarun isbitaal oo ku kala baahsan England.

Dadka 80 jir ah ama ka weyn iyo weliba shaqaalaha guryaha daryeelka ayaa marka hore heli doona tallaalka cudurka covid-19, isla sida shaqaalaha adeegga NHS ee halis dheeraad ah ku jira.

Kooxaha kalee mudnaan leh ayaa markaa ku xigi doona iyadoo loo kala dambaysiinayo da'da iyo halista suurogalka ah.

Tani waa war aad loogu farxay maxaa yeelay helitaanka tallaalka ayaa noqon doonta habka ugu fiican ee dadka ugu nugul looga badbaadinayo koronafayrus waxaana suurogal ah in ay taasi badbaadiso nafta tobaneeyo kun oo qof.

Tallaallada laga helo isbitaallada Manchester

Annaga Manchester gudaheeda, bukaannada 80 jir ah ama ka weyn ee bukaansocod hore ugu yimaadda isbitaalka Salford Royal Hospital ama isbitaalka Stepping Hill Hospital ee Stockport, iyo kuwa guriga loo sii daynayo ka dib markii ay isbitaalka jiifeen ama ku jireen, ayaa ka mid noqon doona dadka ugu horreeya ee helaya tallaalka cudurka covid-19. Dhammaan dadka la tallaalo waxaa qiyaas ahaan 21 maalmood ka dib la siin doonaa tallaal labaad oo kordhis ah.

Isbitaallo dheeraad ah ayaa tallaalka bilaabi doona maalmaha soo socda waqtiga uu sii socdo barnaamijka tallaaliddu. Waxaa tan ka mid noqon doona isbitaalka Manchester Royal Infirmary.

Tallaallada lagu bixiyo bulshada dhexdeeda ee Manchester

Iyadoo qayb ka ah wajiga koowaad ee tallaallada waxaa magaalada la weydiiyey in ay soo ogaato degaan ama gobol lagu bilaabo tallaallada bulshada lagu dhex sameeyo, halkaasoo ay ku tiro badan yihiin dadka 80 jir ah ama ka weyn, iyo weliba sababaha kalee la xiriira sida ay u maamuli karaan kooxaha Takhtarka Guud (GP) (Shabakadaha Daryeelka Aasaasiga ah).

Wythenshawe ayaa loo doortay degaanka ugu horreeya ee loo bilaabayo maalinta Arbacada 16ka Diisembar - waxaana waqti aad u dhow ku xigi doona degaanno kale.

Goobta u qorshaysan Wythenshawe waa xarunta Woodhouse Park Lifestyle Centre.

Dadka u qalma tallaalka waxaa la soo xiriiri doona Takhtarkooda Guud si uu u siiyo dhammaan macluumaadka ay uga baahan yihiin. U qalmistu waxay ku xirnaan doontaa goortii ay dadku gaareen da'da 80 jir, iyo weliba arrimaha kalee caafimaadeed ee la tixgelinayo.

Marka dadka tallaalka loogu yeero, waxay heli doonaan qiyaasta ugu horraysa markaana 21 maalmood ka dib, waxay heli doonaan midda labaad.

Tani waa tallaabo aad muhiim ugu ah la dagaallankeena cudurka Covid, laakiin waxaa weliba garanaynaa in laga yaabo in ay dadku cabsi ka qabaan, markaa David Regan ayaa ka jawaabay su'aalaha soo socda oo ay annaga dib noogu soo celiyeen kooxaha bulshadu:

Tallaalka waxaa loo soo saaray si aad u dhakhso badan – sidee ayaan u ogaan karnaa in uu nabad yahay?

Waxaan anigu hubaa in ay dad farabadan rabaan in ay tan idin weydiiyaan waana wax aad loo fahmi karo.

Oo, haa tallaalka waxaa lagu dhammaystiray xawaare sare –laakiin waxaa taas sabab u ah cudurka safmarka ee aan ku jirno waxayna leedahay mudnaan oo waa muhiim iyadoo ay ka shaqeeyaan aqoonyahannadeena ugu maan weyn ee ugu fiican, ayna isku hureen.

Tallaalku waxuu soo maray baaritaan culus oo bilo socday waxaana la isticmaali doonaa oo keliya marka la buuxiyo xaqiijimaha badbaadada ee adag. Waxaa tan ka mid ah xaqiijinta ama ansixinta hay'adda MHRA, nidaamiyaha rasmiga ah ee Ingiriiska, sida daawooyinka iyo qalabka kale dhammaantood.

Anigu waan heli doonaa waxaanan rajaynayaa in qoyskayguna ay heli doonaan.

Miyuu beddelaa hiddesidahaaga DNA?
Maya, shaki la'aan ma beddelo. Waxa ku jira tallaalka cudurka Covid uma dhawaado walaxa hiddesideyaasha gaarka noo ah oo awood uma leh in uu kaas beddelo ama annaga na beddelo.

Sheekooyin farabadan ayaa ka jira in uu leeyahay waxyaabo laga soo qaaday aadamaha ama xayawaanka
Maya, kuma jiraan waxyaabo laga soo qaaday aadamaha ama xayawaankaba (markaa sidoo kale ma leh qaybo khansiir).

Waxaan anigu maqlay in aad ifilada ka qaadi karto tallaalka ifilada – miyaad cudurka Covid ka qaadi kartaa tallaalkan?
Haddii ifilada aan marka hore soo qaadanno: tallaalka ifilada ee waddankeena lagu isticmaalo kuma jiro fayrus nool, markaa qofna kama qaado – kamana qaadi karo – ifilada.
Haddii dadku ay dareemaan in ay yara caafimaad liitaan ka dib tallaalka ifilada waxaa taas sabab u ah in nidaamkooda difaaca dabiiciga ah ee jirku uu dhaqaaqayo tallaalka ka dib.
Mararka qaar, haddii dadku ay hargab qaadaan isla waqtigaas waxay u arkaan in uu ka dhashay tallaalka, laakiin sidaas ma aha -waa labo shay oo isku yimid uun.
Tallaalka cudurka Covid kuma jiro fayruska dhabta ah, markaa maba dhici kartaba in cudurka laga qaado.

Haddiina aan hore u qabay cudurka Covid – miyuu tallaalku aniga wax ii tari doonaa?
Xataa haddii aad hore u qabtay cudurka Covid, aanad u qalanto tallaalka, waxaa kuu fiican in aad hesho. Waxaa tan sabab u ah in aanan annagu weli ogayn waqtiga ay socoto ka difaacnaanta cudurku. Helitaanka tallaalka ayaa lagu hubin doonaa in aad inta suurogalka ah uga difaacanto cudurka.

Miyaa aniga la igu khasbi doonaa in aan helo tallaalka?
Maya, laguguma khabsi doono, waa wax la doorto. Haddii aad iska diiddo waxaad u baahan doontaa in aad ogaato in aad halis dheeraad ah ugu jirto fayruska iyo gudbintiisa.

Waxaan anigu maqlay in tijaabooyinka tallaalka aanay ku jirin dad ka soo jeeda asallada laga tiro badan yahay – miyay run tahay?
Maya, tijaabooyinka waxaa ku jiray dad ka soo jeeda asallada laga tiro badan yahay. Soo saareyaasha tallaalka ayaa dhawaan codsaday mutaddawaciin dheeraad ah si daraasadda loogu toosiyo kooxaha nuglan – isla sidii ay ugu sameeyeen dadka 65 jir ka weyn.

Miyay habboon tahay in aan waqti u dhexeysiyo tallaallada ifilada iyo cudurka Covid?

Waxaan annagu weliba dadka ku dhiirrigelinaynaa in ay tallaalkooda ifilada helaan islamarka suurogalka ah. Tallaalka ifiladu waa muhiim maxaa yeelay haddii aad halis dheeraad ah ugu jirto koronafayrus, waxaad sidoo kale halis dheeraad ah ugu jirtaa dhibaatooyinka ka yimaadda ifilada. Waxaa cilmibaaris lagu muujiyey in dadku ay islamar keliya qaadi karaan labada cudur, iyadoo ay uga yimaaddaan dhibaatooyin daran ama suurogal ah in ay nafta halis geliyaan.

Waxay dadku weliba u baahan yihiin in ay ugu yaraan 7 maalmood u kala dhexeysiiyaan tallaalka ifilada iyo cudurka Covid.

MANCHESTER
CITY COUNCIL

Manchester Health & Care
Commissioning

NHS